



SHURUUDAHA CODSIGA IYO SOO-BAARASHADA

HABRAACA QABASHADA CODSIGA

Milkiile ahaan, waa in aad sameyso shuruudo aad raacayso markaad go'aamineyso dadka aad gurigaaga ka kireysaneyso. Shuruudahaagu waa in ay ku jiraan liis, sida soo-baarashada dambiyada, sumcadda amaah-bixinta, ama taariikhda kirada guryihii hore, iwm.

Milkiileyaashu badanaa waxay dadka ka qaadaan lacagta codsiga si ay ugu bixiyaan kharashka baarista iyo macluumaadka ay rabaan. Haddii aad dadka ka qaadeyso lacagta codsiga, waxaa khasab ah in aad si qoraal ah ugu sheegto qof kasta ka hor intaadan ka qaadin codsiga, si uu qof kasta u sii ogaado shuruudaha kirada guriga.

Ka dib markaad ka qaaddo lacagtaas, waa in aad siiso waraaq caddeyn ah. Ma isticmaali kartid lacagta codsiga ee baarista ah, mana gashan kartid koonto bangi ilaa aad ku bixiso baarista, oo aad dabadeedna qofka guriga u diiddo, ama aad siiso oo aad markaas la geli karto heshiiska kirada.

Haddii aad qof ka qaaddo lacagta codsiga, oo aad dabadeedna guriga u diiddo, markaas waa in aad, afar iyo toban (14) maalmood gudahood ku si qoraal ah ku ogeysiiso sababaha diidmada, oo waa in ay ku jiraan shuruud kasta oo uu qofku buuxin waayey, iyo magaca, cinwaanka, iyo lambarka taleefanka ee xafiiska baarista kireysteyaasha ama xafiisyada kale ee lagala xiriiro sumcadda amaah-bixinta dadweynaha ee aad qofka awgiis ula xiriirtay.

Inta badan uma baahnid in aad qofka u celiso lacagta codsiga laakiin, waxaa khasab ah in aad lacagta codsiga guriga qofka u celso:

- Haddii aadan lacagta u isticmaalin inaad ku bixiso kharashka soo-baarashada, sumcadda amaah-bixinta, ama inaad ku soo hubiso raadraacyada kale ee qofka
- Waxaad guriga siin kartaa qofkii ka soo horreeyey qofka codsiga dambe.
- Waxaad codsiga ku diidi kartaa shuruudo aadan sheegeyn marka uu qof kaa soo codsado gurigaaga.

Talooyin aad ku sameysan karto Shuruudaha Soo-baarashada Kireystaha:

Shuruudaha baarista waa in aad si caddaalad iyo macquul ah ugu soo baarato dadka raba in ay kaa kireystaan gurigaaga. Shuruudaha baarista waa in ay ku jiraan macluumaad qeexaya sida uu qofku uga soo bixi karo shuruudaha uu ku kireysanayo gurigaaga.

Laakiin ma jiraan shuruud ah in la isticmaalo mid ama gebi ahaan waxyaabaha soo socda. Inta uu socdo habraaca codsiga, waxyaabaha la eegayo qaarkood sida caadiga ah waxaa ka mid ah:

- Taariikhda Dambiyo Hore
- Taariikhda Kirooyinkii Hore
- Dakhliga
- Raadraacyada kirooyinkii hore
- Aqoonsiga

Shuruudahaaga baarista waxa ay sidoo kale u fiican yihiin kiraysteyaasha si ay iyaguna u go'aasadaan haddii ay guriga rabaan. Waxa kale oo aad ku qori kartaa waxyaabaha gaarka ku ah guriga:

- Xayawaan rabbaayad ah
- Cabbista sigaarka
- Barxadda baabuurta
- Qolka dharka lagu dhaqdo
- Dadka guriga ku noolaanaya

Intaa waxaa sii dheer, shuruudaha baarista waa in ay ka tarjumaan in dadka oo dhan si isku mid ah loo soo baaran doono sida uu dhigayo xeer-hoosaadka Saint Paul, [Cutubka 193: Qeybta 193.04](#), iyo in loo hoggaansamo [Cutubka 54-aad Lacagaha Codsiga Kirada](#).

Talooyinka aad waxyaabaha qaarkood uga reebi karto shuruudaha baarista

Haddii uu jiro qof aad ka deyneysa shuruudaha codsiga, waa in aad qorto sababta aad qofka ugu diidi lahayd guriga haddii aad raaci lahayd shuruudaha soo-baarashada ee aad hadda isticmaasho, iyo sabab(aha) gaarka ah ee aad uga deyneysa. Sidoo kale waa inaad qorto haddii aad qofka ka rabto Kiro Horumaris ah ama Lacagta Curaarta.

HOOS WAXAA KU QORAN LIISKA XAFIISYADA BAARISTA KIREYSTAHA EE MINNESOTA

TenantReports.com, LLC
P.O.Box 450
Springfield, PA 19064
(855) 244-2400
www.tenantreports.com

Rental Research Services, Inc.
7525 Mitchell Rd, Suite 301
Eden Prairie, MN 55344
(952) 935-5700
www.rentalresearch.com

Multihousing Credit Control (MCC)
10125 Crosstown Circle,
Suite 100
Eden Prairie, MN 55344
(952) 941-0552
www.mccgrp.com

Screening Reports, Inc.
220 Gerry Dr.
Wooddale, IL 60191
(866) 389-4042
www.screeningreports.com

Rental History Reports, Inc
7900 W 78th St., Suite 400
Edina, MN 55439
(952) 545-3953
www.rentalhistoryreports.com

Twin City Tenant Check
910 Ivy Ave East
St. Paul, MN 55106
(651) 224-3002
www.tcofmn.com

First Check
P.O. Box 334
Wyoming, MN 55092
(no phone or website)

AppFolio, Inc.
Consumer.relations@appfolio.com
(866) 648-1536
www.appfolio.com

RealPage Resident Screening
c/o Leasing Desk Screening
Consumer Relations
2201 Lakeside Blvd.
Richardson, TX 75082
(866) 934-1124

TransUnion
My Smart Move - Disputes
PO Box 800
Woodlyn, PA 19094
www.mysmartmove.com

Checkr.com
Attn: Legal Department
1 Montgomery St, Ste. 2400
San Francisco, CA 94104
www.checkr.com

TenantAlert.com
23801 Calabasas Rd, Ste 1022
Calabasas, CA 91302
www.TenantAlert.com

Ujeedka qoraalkan waa macluumaad ahaan oo keliya. Maamulka magaalada Saint Paul marna ma xayeysiyaan xafiisyo ama adeegyo gaar ah



WIXII FAAHFAAHIN DHEERAAD AH, BOOQO:

- www.lawhelpmn.org
- [Attorney General: Landlord and Tenant - Rights and Responsibilities](#)
- StPaul.go/SAFE

